Somali

Dhaafsan iridaha dugsiga: koobitaan warbixin

Warbixin la soo saaray Bisha Shanaad 2008

Warbixinta la yidhaahdo *'Dhaafsan iridaha dugsiga'* (*Beyond the school gates)* waxay soo bandhigaysaa natiijooyinka cilmi-baadhis la sameeyay oo ka tirsan *Mashruuca Dugsiyo oo Loo Dhan Yahay* (*Inclusive Secondary Schools Project*) kaasoo bilaabmay sannadkii 2005, oo uu soo saaray Golaha Qaxootigu uuna maalgaliyay KPMG Foundation. Ujeedada guud ee mashruucu waxay ahayd in la baadho oo la sahamiyo siyaabo cusub oo lagu hawlgali karo oo dugsiyada ku xidha qaxootiga iyo dadka da'da yar ee magangalyo-doonka ah, waalidkooda iyo daryeeleyaasha iyo Ururada Beelaha Qaxootiga (Refugee Community Organisations - RCOs). Warbixintu waxay falanqaynaysaa natiijooyinka qaybta cilmi-baadhista ee mashruuca taasoo lagu sahamiyay baahiyaha iyo waayo-aragnimada qaxootiga iyo magangalyo-doonka marka laga eego xagga waxbarasahada dugsiga sare gudaha Iglan. Waxa kale oo uu *Mashruuca Dugsiyo Sare oo Loo Dhan Yahay* uu dhisay iskaashiyo tijaabo ah oo u dhexeeya dugsiyada iyo ururada beelaha/taageerada, iyada oo ujeedadu tahay in wax laga qabto qodobada saameeya ka-qaybgalka waalidka/daryeelaha iyo soo-saarista tabo fiican. Natiijooyinkii ka soo baxay qaybtii cilmi-baadhista iyo tii horumarinta waxay labaduba asaas u yihiin xidhmo qoraal ah oo loogu talogalay dugsiyada iyo beesha qaxootiga/ururada taageerada si loo kordhiyo ka-qaybqaadashada beesha qaxootiga xagga waxbarashada qaxootiga iyo dadka da'da yar ee magangalyo-doonka ah.

Cilmi-baadhista lagaga hadlayo warbixinta waxay ka koobnayd 70 wareysi oo qoto dheer, iyo su'aalo sahamin ah oo lala yeeshay Ururada Beelaha Qaxootiga, dugsiyada sare iyo maamulada degmada, si:

- loo baadho waayo-aragnimada iyo baahiyaha kooxahaas
- loo garto caqabadaha waaweyn ee horyaala ka-qaybgalka, iyo
- loo garto tusaalooyinka tabaha loola jeedo in laga gudbo caqabadahaas.

Xaaladaha siyaasadeed iyo sharciyeed, iyo waliba qaabka cilmi-baadhista, waxa si faahfaahsan loogu falanqaynayaa cutubka labaad iyo saddexaad ee qoraalka. Cutubka afraad waxa lagu baadhayaa waayaha waxbarashada heerka dugsiga sare ee dadka da'da yar iyo waalidka/daryeeleyaasha. Cutubka shanaad waxa uu baadhayaa caqabadaha horyaala galitaanka iyo ku-guuleysiga waxbarashada, halka cutubka lixaad uu bayaaminayo tabaha ka gargaaraya beelaha qaxootiga inay ka gudbaan caqabadahaas. Warbixintu waxay ku dhamaanaysaa talooyin loo soo saaray in danleyaasha lagaga gargaaro inay si ka sii fiican sidii hore u haqabtiraan baahiyaha beelaha qaxootiga.

British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom, VAT reg no: 936 519 988

Waayaha iyo hawlgalidda

Dadka da'da yar ee ka qaybgalay cilmi-baadhistan waxay tilmaameen heerar sare oo ka-qaybgal waalid/daryeele, kuwaasoo si weyn u kala duwanaa, oo tusaale ahaan isugu jiray kulanno hal mar ah ilaa kulanno tiro badan. Inkasta oo aqoonta Ingiriisigu ay noqon karto caqabad, waxay waalidku sii wadeen inay isku dayaan inay hawlgalaan iyada oo ay jirto caqabadaasi, waxana ay dadka da'da yari guud ahaan dareen fiican ka bixiyeen taageerada ay ka heleen waalidka/daryeeleyaasha.

Waalidka/daryeeleyaashu waxay lahaayeen heerar ku-qanacsanaan guud xagga dugsiyada. Heerarka ka-qaybgalku way sareeyeen, gaar ahaan marka ay jirtay isgaadhsiin lala lahaa dugsiga iyo shaqaale taageero oo soo-dhaweyn leh. Waalidka/daryeeleyaasha qaarkood waxay soo jeediyeen siyaabo lagu hagaajin karo ka-qaybgalka, sida isgaadhsiinta iyo warcelinta laga helayo dugsiyada oo sii fiicnaata.

Dugsiyadu waxay tilmaameen in ka-qaybgalka fiicani uu qodob muhiim ah ka yahay wacnaanta iyo guuleysiga guud ee dadka da'd yar, isla markaana uu waalidka/daryeeleyaasha u kordhiyo awoodda ka-warhaynta waxbarasahda caruurtooda. Hase yeeshee dugsiyada qaarkood waxay tilmaameen dhibaatooyin ka jira sidii loola macaamili lahaa waalidka/daryeeleyaasha qaarkood, waxana ay sheegeen muhimadda ay leedahay jawi soo-dhaweyn leh iyo isbarashada.

Ururada Beelaha Qaxootiga ee ka qaybgalay daraasadda waxay bixiyeen tiro ah adeegyo la xidhiidha waxbarashada, oo la soo saaray si looga jawaabo baahiyaha loo soo bandhigay, oo ay ku jiraan walaacyo ku saabsan guuleysiga hoose ee ardayda, iyo baahida loo qabo taageero xagga duruusta dugsiga iyo dhibaatooyin dabeecadeed. Waxa kale oo ay Ururada Beelaha Qaxootigu tilmaameen muhimadda ay leedahay in kor loo qaado heerarka guuleysiga, barnaamijyo lagu hormarinayo hiddaha iyo afka dadka da'da yar, iyo waalidka/daryeeleyaasha oo laga gargaaro inay la qabsadaan wadanka iyada oo la adeegsanayo barashada Ingiriisiga. Waxay Ururada Beelaha Qaxootigu si gaar ah xoogga u saareen baahida loo qabo taageero la siiyo waalidka/daryeeleyaasha, maadaama marrarka qaarkood ay u muuqatay in iyaga ay dhib ku sii tahay inay wadanka la qabsadaan marka la barbar-dhigo caruurtooda.

Caqabadaha Horyaala Galitaanka

Waxay cilmi-baadhistu tilmaantay tiro ah caqabadaha waaweyn ee si dhab ah uga horjoogsan kara qaxootiga iyo magangalyo-doonka da'da yar inay galaan waxbarashada dugsiga sare.

- Jawaabeyaashu waxay la kulmeen tiro ah **dhibaatooyin waaweyn xagga helitaan boosas dugsi**, oo ay ku jiraan sugitaan xad-dhaaf ah (oo ah ilaa todoba bilood) marka ay sugayaan boos dugsi. Taageerada ay bixiyeen adeegyo kala duwan ayaan jawaabeyaal badan ka baajin sugitaanka.
- **Cabsi-galinta iyo takoorista** ayay dadka da'da yar iyo Ururada Beelaha Qaxootigu ku sheegeen inay walaac weyn ku hayaan. Dadka da'da yari waxay soo sheegeen inay ka gaabsadaan inay sheegaan inay yihiin qaxooti ama magangalyo-doon, ama ay ka hadlaan taariikhdoodii hore iyaga oo ka cabsi qaba in takooris dheeraad ah lagu sameeyo. Ururada Beelaha Qaxootigu waxay tan ku tilmaameen arrin in badan ay la kulmaan.
- **Qoysasku waxay soo sheegeen caqabado dhaqaale oo horyaala galitaanka** sida awood-dari dhaqaale xagga hawlaha ka-baxsan manjahka, iyo dhibaatooyin ka haysta bixinta buugaagta dugsiga, labiska dugsiga iyo alaabooyin kale oo la xidhiidha dugsiga. Taasi waxay saameyn xun ku yeelatay awoodda ay dadka da'da yari kula qabsan lahaayeen dugsiyadooda.
- **Waxa kale oo ay Ururada Beelaha Qaxootigu soo sheegeen la'aanta adeegyo** taasoo keenta dhibaatooyin lagala kulmo sidii loo heli lahaa adeegyo la xidhiidha waxbarashada, iyo sidii loo heli lahaa guryo bilaash ah ama kiro jaban oo lagu bixiyo

adeegyada. Maalgalinta lagu gargaarayay galitaanka waxay badanaa ahayd mid ah mudo gaaban, sidaa daraadeedna meesha ay hawlo ka socdeen ayay taasi ka yareysay waxqabadka.

- Ururada Beelaha Qaxootiga iyo dugsiyada labaduba waxay caqabado kala kulmeen **illaha iyo adeegyada ay tababar waxtar leh ku siin lahaayeen** shaqaalaha iyo macallimiinta, taasoo yareysay awoodda ay ku bixin lahaayeen talooyin haboon ama sare loogu qaadi lahaa wacyigalinta macallimiinta.
- La'aanta aqoonta luqadda Ingiriisiga ayaa caqabad weyn ku ahayd macaamil waxtar leh oo waalidka/daryeeleyaasha lagala yeesho habka waxbarashada. Waxay dugsiyadu soo sheegeen in **dhibaatooyin ay kala kulmeen gudbinta horumarka ardayda**, gaar ahaan marka ay **dadka da'da yar u adeegsadaan turjubaano**.
- **Nidaamka magangalyada Boqortooyada Midowday (UK)** naftiisa ayaa abuura tiro ah caqabado, oo ay ku jirto xasilooni-la'aanta haysataa magangalyo-doonka ku jira dugsiyada, laakiin ka baqaya in la mastaafuriyo. Adeegsiga firdhinta iyo hoy ku-meel-gaadhsiis ah ayaa macnaheedu tahay in **caruurta lagu qasbo in si celcelis leh la geeyo dugsiyo cusub** taasoo saameyn xun oo qoto dheer ku yeelan karta awoodda ay ku dhex gali lahaayeen bulshada, ku xejisan lahaayeen saaxiibada oo ay taageero uga heli lahaan beelaha.
- **Waayaha dhacdo xanuun leh iyo baxsiga** ayaa saameyn qoto dheer ku yeelan kara dabeecadda caruurta, gaar ahaan xidhiidhka ay la leeyihiin caruurta iyo qayrkooda ama facooda.
- Dadka da'da yar iyo waalidka/daryeeleyaashu waxay la kulmi karaan **aqoon la'aan xagga nidaamka dugsiga**, waxana ay badanaa dareemeen in dugsiyadu yihiin meelo leh cabsi iyo wareer.
- Inkasta oo ay jirto xaqiiqada ah in Ururada Beelaha Qaxootigu ay noqon karaan kuwo ku haboon inay gargaar ka geystaan hagaajinta ku-guuleysiga dugsiyada, haddana xidhiidhka aanay la leeyihiin dugsiga oo aan fududeyn, iyo waliba dugsiyada oo aan awoodin inay gartaan oo la xidhiidhaan Ururada Beelaha Qaxootiga ayaa abuuri kara **in aanu jirin iskaashi wada-shaqeyn leh** si loo xaliyo dhibaatooyinkaas.

Haqabtirka baahiyaha qaxootiga iyo magangalyo-doonka

Waxa uu mashruucu tilmaamay tiro ah tabo lagaga jawaabo caqabadaha kor lagu sharaxay. Waxa tabahaas ku jiray:

- In la helo wakhti dugsi oo la kordhiyay si loo bixiyo waxqabadyo dhaafsan hawlo maalmeedka dugsiga si waalidka/daryeeleyaasha qaxootiga ah looga gargaaro inay dugsiga iyo beel-weynta ka qaataan door intii hore ka balaadhan, iyo wialiba sida loola macaamilo dadka da'da yar.
- Ururada Beelaha Qaxootiga qaarkood waxay ku guuleysteen inay soo saaraan maalgalin lagu fuliyo hawlo la xidhiidha waxbarashada.
- Dugsiyada qaarkood waxay hawlgaliyeen shaqaale isku xidha guriga, dugsiga iyo beesha kuwaasoo sameeyay xidhiidh muhiim ah oo ka dhexeeya beelaha iyo dugsiyada. Dugsiyada qaarkood waxay doorkan u adeegsadeen u-doodeyaal beeleed oo aan qaabeysnayn.
- Dugsiyada iyo Ururada Beelaha Qaxootigu waxay soo sheegeen isticmaalidda la-taliyeyaal ardayga la fac ah si loo helo gargaar waxbarasho, soo-dhaweyn iyo taageero guud.
- Tiro yar oo ah dugsiyo ayaa xidhiidh fiican la yeeshay adeegyo iyo ururo takhasus leh si taageero niyadeed iyo bulsho loo siiyo dadka da'da yar ee waayo leh saameyn maskaxeed la soo kulmay.
- Taageerada luqadda ayaa loo arkay inay tahay mid muhiim ah, waxana badanaa la bixiyay iyada oo la adeegsanayo bixiyeyaasha caadiga ah. Hase yeeshee, waxa la tilmaamay tiro

kale oo ah habab sida waxbarasho ah maalmaha Sabtida oo ay bixiyaan dugsiyo iyo Ururada Beelaha Qaxootiga.

- Dugsiyada qaarkood waxay soo sheegeen inay qoraalo u tarjumeen waalidka/daryeeleyaasha oo ay bixiyeen turjubaanno.
- Dugsiyo badan ayaa bixiyay kulanno soo-dhaweyn oo loo qorsheeyay dadka da'da yar iyo waalidka/daryeeleyaasha, kuwaasoo badanaa ka koobnaa war ku saabsan habka galitaanka, manhajka iyo fursadaha lagula macaamili karo dugsiyada. Dugsiyada qaarkood waxay abuureen buugaag yaryar oo loo qorsheeyay baahiyaha qaxootiga da'da yar.
- Waxa kale oo ay Ururada Beelaha Qaxootigu ay waalidka/daryeeleyaasha siiyeen war ku saabsan nidaamka dugsiyada Ingiriiska, oo ay ku jiraan la-talin fool-ka-fool ah iyo koorasyo ku saabsan sida ay caruurtooda uga gargaari lahaayeen waxbarashada.
- Dugsiyada qaarkood waxay abuureen habab macaamil oo joogto ah sida subaxyo kafee la wada cabo iyo kulanno gargaar-gaadhsiin ah oo loo qabto kooxaha beelaha qaxootiga.
- Waxa tusaalooyin laga bixiyay shaqo iskaashi oo ay dugsiyada sare iyo Ururada Beelaha Qaxootigu galeen si loo hagaajiyo waayaha waxbarashada ee qaxootiga iyo magangalyo-doonka da'da yar, iyo waalidkooda iyo daryeeleyaashooda.

Gunaanad iyo soo-jeedin

Waxa warbixinta lagu soo gunaanaday soo-jeedinno si danleyaasha looga gargaaro inay sii hagaajiyaan habaqtirka baahiyaha beelaha qaxootiga. Danleyaashaas waxa ku jira dugsiyada, maamulada degmooyinka, Ururada Beelaha Qaxootiga, ururada taageerada qaxootiga iyo waaxaha dawladda.

Warbixinta cilmi-baadhista oo buuxda, natiijooyinka sahaminta iyo qoraal illeed la soo saaray oo loogu talogalay in dugsiyada iyo Ururada Beelaha Qaxootiga lagaga gargaaro haqabtirka baahiyaha caruurta qaxootiga oo ka tirsan *Mashruuca Dugsiyo Sare oo Loo Dhan Yahay (Inclusive Secondary Schools Project)* waxa laga heli karaa: www.refugeecouncil.org.uk/inclusiveschools